

## War cusub: Soo gelidda waddanka Iswiidhand oo lagu xiray shardi ah in la isa soo baaro.

**Dadka aan Iswiidhishka ahayn ee ka imanaya dibadda waa in ay iska soo baaraan cudurka karoona (Covid-19). Baaritaakuna waa inaanu ka weynaan 48 saacodood uuna cadeynayo inaad cudurka qabin. Kuma jiraan dadka ka yar 18 sano, kuwa waddanka deggan ama kuwa shaqooyinka muhiimka ah u yimaada waddanka.**

Weli waa mamnuuc iney Iswidhan soo galaan dadka ka yimaada waddamada ka baxsan EES. Waxaa ayagana la mid ah kuwa ka yimaada Ingiriiska, Deenmaark iyo Norway.

Markii hore waxaa la ogolaa iney waddanka soo galaan dadka deggan xuduudaha sida Norway iyo Deenmark oo haddana shaqada u yimaada Iswiidhan, laakiin hadda ayaga xataa waa la adkeeyey oo waa iney muujiyaan iney ka bed qabaan cudurka.

Haddiise qofku haysato dhalashada Iswiidhishka mar walba waddanka waa uu soo geli karaa, laakiin waa in qofku markuu soo galaba horey iskaga baadhaa cudurka, oo haddana shan maalmood kadib is baadhaa. Inta uu qofku jawaab ka heleyana waa inuu ku ekaadaa guriga. Lix jir ilaa qofka da'da ah waa la baarayaa markey Iswidhan kusoo laabtaan. Booliiska iyo shaqaale kale ee dawladeed ayaa u xilsaaran ilaalinta xuduudaha dalka.

EES waxaa leysku yiraa waddamada EU-da oo lagu daray saddexdan waddan ee kala ah Lichtenstein, Norge och Island.

Go'aankani wuxuu soconayaa laga bilaabo 6-da febraayo ilaa iyo 31-ka maarso.

Halkan ayaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah.

### Halkan waxaad ka akhrisan kartaa warbixinta talaalka

Hadda gobolka Kalmar waxaa ka socota talaalidda dadka da'da ah iyo kuwa ka shaqeyya hay'adaha caafimaadka. Bartamaha Febraayo waxaa dadka jira 80 sano iyo wixii ka weyn loo so diri doonaa martiqaad iney is talaa laan ah. Todobaad ka dibna waxaa loo diraya dadka da'doodu u dhaxayso 70 illaa 79, haddana bilowga bisha maarso waxa warqada loo dirayaa kuwa jira 65-69 sano.

Warqadday ku qorantahay sida waqtiga balanta loo sameysanayo. Gobolka Kalmar iyo hal gobol oo kale ayaa hadda ugu horeeya heerka talaalista dadkiisa.

Si loo ogaado waxa talaalkani yahay waxay hay'adda caafimadka waddanku soo saartay qoraalo iyo warbixinno ku saabsan talaalka. Warbixinadaa waxaa ku qoran, qofka la talaalayo, sidey talaaliddu u qabsoomayso, waxa laga yeelayo haddii qofku cudur kale qabo, waxa ay ku kala duwan yihiin dadka yar yar iyo kuwa da'da ah iyo warbixino kaloo badan.

### Halkan baad ka aqrisan kartaa warbixinadaas.



Ku aaddi/beeg kaamirada moobiilka kodka-QR-ka. Luuqadaada.

#### Hay'adda caafimaadka



Warbixinno kaloo ku saabsan karoona (covid-19)

**Bogga gobolka ee**  
[www.1177.se](http://www.1177.se)



Hay'adda xaaladaha deg dega ah

**Kris-information.se**



**Labadii wiigba marbaan warqaddan warbixinta soo saari doonaa.** Qoraalkan warbixinta ah waxaa soo diyaariyey, hay'adda xaaladaha degdegga ah ee gobolka. Hay'adda xaaladda deg degga ah ee gobolka Kalmar waa wada shaqeyn ka dhaxaysa dhammaan degmooyinka gobolka, gobolka, hay'adda caafimaadka ee gobolka iyo mas'uuliyiin kale oo gobolka ah. Markay xaalad deg deg ahi ka dhex dhacdo bulshada, si wada jir ah baynu isu caawinnaa.



[facebook.com/krissamverkan.kalmar](https://www.facebook.com/krissamverkan.kalmar)

Kalmar kommun

